

JAMHUURIYADDA  
SOMALILAND



REPUBLIC OF  
SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA  
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند

*Sannadkii 11aad*

*Cadad Gaar ah*

*Tariikhda Daabacada*  
16/07/2022

FAAFINTA RASMIGA AH EE  
SADDEX BILOOD-LAHA AH  
APRIL TO JUNE

Email: [garyaqaankaguud@gmail.com](mailto:garyaqaankaguud@gmail.com)  
Web: [www.garyaqaankaguud.com](http://www.garyaqaankaguud.com)



## TUSMADA CADADKA

**QAYBTA KOWAAD:** XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANI YADDA QARANKA:

1. Xeerka Ka-hortagga iyo xakamaynta Ka-ganacsiga Tahriibinta Dadka, Xeer Lr. 101/2021 (Cadad gaar ah)

**QAYBTA LABAAD:** XEER MADAXWEYNE:

- |     |  |    |
|-----|--|----|
| 2.  | <b><u>Wareegto Madaxweyne</u></b><br>Cafis                       | 2  |
| 3.  | <b><u>Wareegto Madaxweyne</u></b><br>Magacaabid                  | 3  |
| 4.  | <b><u>Wareegto Madaxweyne</u></b><br>Cafis                       | 4  |
| 5.  | <b><u>Wareegto Madaxweyne</u></b><br>Cafis                       | 6  |
| 6.  | <b><u>Wareegto Madaxweyne</u></b><br>Magacaabid Guddi-baadhiseed | 7  |
| 7.  | <b><u>Wareegto Madaxweyne</u></b><br>Magacaabid                  | 10 |
| 8.  | <b><u>Wareegto Madaxweyne</u></b><br>Magacaabid                  | 13 |
| 9.  | <b><u>Wareegto Madaxweyne</u></b><br>Magacaabid                  | 14 |
| 10. | <b><u>Xil Ka Qaadis</u></b>                                      | 15 |
| 11. | <b><u>Madaxweyne</u></b><br>Magacaabid                           | 16 |

**QAYBTA SADEXAAD:** XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIJOYINKA DOORASHOYINKA & BARNAAMIYADA DAWLADA:

12. SOOMA BIXIN

**QAYBTA AFRAAD:** GO'AANADA MAAMUL & QARAARADA:

13. SOOMA BIXIN

**QAYBTA SHANAAD:** AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:

14. SOOMA BIXIN



**QAYBTA LABAAD:**

**XEER MADAXWEYNE:**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

---

## **Xafiiska Madaxweynaha**

Sum: JSL/XM/WM/222-851/042022

Taar: 04/04/2022

### **Wareegto Madaxweyne**

#### **Cafis**

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Xeerka Ciqaabta Guud Qodobkiisa 149;

Markaan Tix-galiyey: Qoraalka Xildhibaanada Golaha Wakiillada iyo odayaasha Maxbuuska ee ujeedadiisu tahay codsiga Cafiska Maxbuuska Magaciisu yahay Siciid Aadan Maxamed;

Markaan Arkay: soo-jeedinta cafista xafiiska Xeer ilaalayaha Guud ee Ciidamada Qalabka-sida ee Jamhuuriyadda Somaliland ee sumadiisu tahay



XIG/XX/CQ/0005/2022 <sup>kuna</sup>  
taariikhaysan 05/01/2022

Markaan La-tashaday:

Hay'adaha Ay Khusayso;

**Waxaan Go'aansadey:**

In laga bilaabo tariikhda Maanta aan Cafis u fidiyo Siciid Aadan Maxamed oo kamid ah maxaabiista xukumman ee kujira xabsiga.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

---

**Xafiiska Madaxweynaha**

Sum: JSL/XM/WM/222/854/042022

Taar: 07/04/2022

**Wareegto Madaxweyne**

**Magacaabid**

Markaan Arkay:

Qodobka 90aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;



Markaan Arkay:

Aqoontiisa, kartidiisa iyo waaya-  
aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay:

In uu Hanan Karo masuuliyada  
ka dhalanaysa xilkan;

Markaan Sameeyey:

La-tashi;

### Waxaan Go'aansadey;

In Cabdirisaaq Ibraahin Maxamed Faarax laga bilaabo taariikhda  
maanta uu ahaado Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka iyo  
Horumarinta Jidadka ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

---

## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-856/042022

Taar: 17/04/2022

Wareegto Madaxweyne

Cafis



Markaan Arkay:

Dastuurka Jamhuuriyadda  
Somaliland, Qodobka 90aad  
Farqadiisa 5aad;

Markaan Tix-galiyey:

War-bixinta Taliska Guud ee  
Ciidanka Asluubta ee sumadiisu  
tahay TCA/G-1/152/2022 kuna  
taariikhaysan 16/04/2022.

Markaan Arkay:

Soo-jeedinta xafiiska Xeer  
ilaaliyaha Guud ee Qaranka ee  
sumadiisu tahay  
XIG/JSL/106/2022 kuna  
taariikhaysan 16/04/2022

Markaan La-tashaday:

Hay'adaha Ay Khusayso;

### **Waxaan Go'aansadey;**

In laga bilaabo tariikhda Maanta aan Cafis u fidiyo Maxaabiista loo haysto dembiyada Madaniga ah eek u xidhan xabsiyada dalka oo tiradoodu dhan tahay 41 (Kow iyo Afartan) maxbuus. Waxa cafiskan fulinaya Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, iyada oo la raacayo Liiska Maxaabiista Wareegtadan ku lifaaqan.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**



## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-857/052022

Taar: 01/05/2022

### Wareegto Madaxweyne

#### Cafis

Markaan Arkay:

Dastuurka Jamhuuriyadda  
Somaliland, Qodobka 90aad  
Farqadiisa 5aad;

Markaan Tix-galiyey:

War-bixinta Taliska Guud ee  
Ciidanka Asluubta ee sumadiisu  
tahay TCA/G-1/142/2022 kuna  
taariikhaysan 12/04/2022.

Markaan Arkay:

Soo-jeedinta xafiiska Xeer  
ilaaliyaha Guud ee Qaranka ee  
sumadiisu tahay XIG/JSL/98/2022  
kuna taariikhaysan 12/04/2022.

Markaan La-tashaday:

Hay'adaha Ay Khusayso;

#### Waxaan Go'aansadey;

In laga bilaabo tariikhda Maanta aan Cafis u fidiyo munaasibada Ciida awgeed Maxaabiista dembiyada fudud ku xukuman ee xabsiyada dalka ku xidhan, oo tiradoodu dhan tahay 360 (saddex boqol iyo lixdan) maxbuus. Cafiskani saamayn kuma laha xuquuqda madniga ah iyo raadka ciqaabeed ee ka dhalanaya dembiyada ay ku xukunaayeen, waxa



cafiskan fulinaya Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, iyada oo  
la raacayo Liiska Maxaabiista.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**JAMHUURIYADDA**



**SOMALILAND**

---

## **Xafiiska Madaxweynaha**

Sum: JSL/XM/G/083-859/052022

Taar: 10/05/2022

### **Wareegto Madaxweyne**

#### **Magacaabid Guddi Baadhiseed**

Markaan Arkay:

Qodobka 90aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay:

Qodobka 13aad, Faqradihiisa 1aad  
iyo 2aad iyo Qodobka 15aad,  
Faqradiisa 1aad iyo 2aad ee Xeerka  
Guud ee Doorashooyinka iyo  
Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha;  
Xeer Lr: 91/2020;

Markaan Arkay:

Qoraalka summaddiisu tahay  
KDQ/XK/008/2022, kuna





Taariikheysan 25/04/2022,  
ujeeddadiisuna tahay Codsii Guddi  
Badhiseed;

Markaan Arkay: Qoraalka Sumadiisu tahay  
GDQ/XK/009/2022 kuna  
taariikhaysan 27/04/2022,  
ujeeddadiisuna tahay is-beddellagu  
sameeyay Hogaanka komishanka  
Doorashooyinka Qaranka;

Markaan Arkay: War-bixinta sumadeedu tahay  
REF: HAN/GQ/05/62/2022, kuna  
taariikhaysan 05/05/2022 kana soo  
baxdey Hanti-dhowraha Guud ee  
Qaranka, ujeedadeeduna tahay  
soogudbin war-bixin baadhiseed;

Markaan Arkay: War-bixinta Sumadeedu tahay  
XGD/WM/02/08/191/2022 kuna  
taariikhaysan 05/05/2022, kana soo  
baxdey Xafiiska Xisaabiyaha Guud,  
ujeedadeeduna tahay war-bixinta  
xisaab xidhka Komishanka  
Doorashooyinka Qaranka;

Markaan Arkay: Muhiimadda uu komishanka  
Doorashooyinka Qaranku u  
leeyahay hannaanka  
dimuqraadiyadeed ee Dalka iyo  
hirliginta Doorashooyin Xor iyo  
xalaal ah;

Markaan Arkay: Khilaafka Maamul iyo Maaliyadeed  
ee soo kala dhexgalay xubnaha  
komishanku uu caqabad ku noqon  
karo xil gudashada waajibaadka iyo



hawlaha shaqo ee **Komishanka**  
**Doorashooyinka Qaranka;**

**Markaan Helay:**

**Talo-bixinta sharci ee Garyaqaanka**  
**Guud iyo Xeer ilaaliyaha Guud ee**  
**Qaranka;**

**Waxaan Go'aamiyey;**

1. In aan u magacaabo xubnaha magacyadoodu hoos ku xusan yihiin in ay noqdaan Guddi-baadhiseed Madaxa-bannaan oo ka soo warbixisa **Komishanka Doorashooyinka Qaranka**, si waafacsan Qodobka 15aad farqadiisa 1aad iyo 2aad ee Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Codbixiyayaasha; Xeer Lr: 91/2020

<b>Tiro</b>	<b>Magaca</b>	<b>Xilka</b>
1.	Maxamed Jaamac Cabdi	Guddoomiye
2.	Farxaan Maxamed Cali	Xubin
3.	Siciid Xasan Habbane	Xubin
4.	Axmed Saleebaan Jaamac	Xubin
5.	Bashiir Cabdi Xariir	Xubin

2. Guddigu waxay baadhitaan ku soo sameyn doonan arrimaha ay ka mid yihiin:
  - Nidaamka Maamulka iyo Maaliyadda ee xubnaha **Komishanka**.
  - Nidaamka iibka iyo Qandaraasyada adeegyada iyo agabka **Komishanka**.
  - Nidaamka Maamulka iyo Diiwan-gelinta Hantida raagta ee **Komishanka**.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**



## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-881/062022

Taar: 27/06/2022

### Wareegto Madaxweyne

#### Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda  
Somaliland Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontooda, Kartidooda iyo  
Waaya-aragnimadooda;

Markaan ku Qancay: In ay Hanan Karaan Masuuliyadda  
ka Dhalanaysa Xilalkan;

Markaan Sameeyey: La-tashi;

#### Waxaan Go'aamiyey;

In laga bilaabo tariikhda maanta aan masuuliyiintan u magacaabo xilalkan.

Tir.	Magaca	Xilka
1	Axmed Aadan Axmed Buuxane	Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka
2	Cabdiqaadir Iiman Warsame	Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Beeraha
3	Maxamuud Warsame Jaamac	Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Hawla Guud, Dhulka iyo



		Guriyaynta
4	Maxamuud Jaamac Warfaa	Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo Horumarinta kaluumeysiga
5	Yurub Abiib Cabdi Cumer	Wasiir ku-Xigeenka Wasaarada Horumarinta Beeraha
6	Cabdimaajiid Ibraahin Muumin	Wasiir ku-Xigeenka Wasaarada Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska
7	Mukhtaar Maxamed Cali	Guddoomiyaha Hay'adda Dhowrista Tayada
8	Guuleed Muse Galaal	Guddoomiyaha Hay'adda Caymiska Qaranka
9	Xamse Cabdi Ibraahin	Guddoomiye ku-Xigeenka Hay'adda Dhowrista Tayada
10	Maxamed Xuseen Axmed	Guddoomiye ku-Xigeenka Hay'adda Caymiska Qaranka
11	Muuse Jaamac Maxamed	Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Gadiidka iyo Horumarinta Jidadka
12	Fowsi Maxamed Faarax	Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta.
13	Khadar Ibraahin Maxamed	Agaasimaha Sanduuqa Horumarinta Dhalinyarada

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**



## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-883/062022

Taar: 27/06/2022

### Wareegto Madaxweyne

#### Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda  
Somaliland Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waaya-  
aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In ay Hanan Karo Masuuliyadda  
ka Dhalanaysa Xilkan;

Markaan Sameeyey: La-tashi;

#### Waxaan Go'aansadey;

In Cabdiraxmaan Yaasiin Maxamed, laga bilaabo taariikhda maanta uu  
ahaado Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland ee Dalka Faransiiska.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-885/062022

Taar: 29/06/2022

### Wareegto Madaxweyne

#### Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda  
Somaliland Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontooda, Kartidooda iyo  
Waaya-aragnimadooda;

Markaan ku Qancay: In ay Hanan Karaan Masuuliyadda  
ka Dhalanaysa Xilalkan;

Markaan Sameeyey: La-tashi;

#### Waxaan Go'aamiyey:

In laga bilaabo taariikhda maanta aan masuuliyiintan u magacaabo xilalkan;

Tir.	Magaca	Xilka
1	Khaalid Mire Nuux	Agaasimaha Guud ee Hay'ada Shaqaalaha Dawlada
2	Ismaaciil Aw Muxumed Aye	Agaasimaha Fulinta ee Komishanka Qaranka



Xakamaynta Aids-ka

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XKQ/222/1-884/062022

Taar: 29/06/2022

Ku: Axmed Cabdi Ismaaciil;  
Agaasimaha Fulinta ee Komishanka Qaranka ee Xakamaynta  
HIV/AIDS

Ku: Maxamed Geedi Caynaanshe,  
Agaasimaha Guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawlada

Ujeedo: Xilka-qaadis

Mudaneyaal,

Sida aad la socotaan, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan idinka qaado xilalkii aad hayseen waxaan idiinka mahad-celinayaa mudadii aad hayseen xilalka Qaranka.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-892/062022

Taar: 29/06/2022

### Wareegto Madaxweyne

#### Magacaabid

- Markaan Arkay: Qodobka 90aad Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waaya-  
aragnimadiisa;
- Markaan ku Qancay: In ay Hanan Karo Masuuliyadda  
ka Dhalanaysa Xilkan;
- Markaan Sameeyey: La-tashi;

#### Waxaan Go'aansadey:

In Siciid Xasan Habane, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiir ku-xigeenka Wasaarada warfaafinta, Dhaqangelinta iyo Wacyi-Gelinta Ee Jamhuuriyadda Somaliland.

**Allaa Mahad leh**

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**